

Qeybta cilmiga uurka iyo wixii raaca
Daryeelka caafimaadka dumarka

Macluumaadka bukaanka
Dib loo eegay: 2023-12-11
Mas'uulka xogtan: Karin Breeding, Taqtar sare

Rubella – Tallaal ka dhan ah jadeecada, jadeeca jarmalka iyo qaamow-qashiirka

Jadeeca jarmalku (rubella) waxay keeni kartaa dhaawac ku yimaada uurkujirka inta uu uurka ku jiro. Qofti aan cudurka difaac u lahayn ama aan laga tallaalin wuxuu halis ugu jiraa inuu qaado jadeeca jarmalka – haddii ay ugu xumaatana uu qaado xilli hore oo uurka ka mid ah.

In, inta aad uurka leedahay, la baaro dhiiggaaga ayaan ku ogaan karnaa inaad difaac u leedahay iyo in kale. Adigaaga aan difaaca u lahayn waxaa iminka, dhalitaanka ka dib, toos laguugu casuumayaa tallaalka ka dhanka ah jadeeca jarmalka.

Tallaal ka dhan ah jadeeca jarmalka oo keliya hadda ma jiro. Waxaa taa baddalkeeda jira tallaal xitaa qofka ka ilaalinaya jadeecada iyo qaamow-qashiirka.

Jadeecadu waa cudur leh feebaro badan, qufac iyo daal daba dheeraada.

Xaalado dhif ah waxaa ka dhasha caabuuq ku dhaca xuub axaleedka maskaxda oo keeni kara dhaawac joogto ah.

Qaamow qanshiirku wuxuu keenaa caabuuq ku dhaca xuub axaleedka maskaxda iyo dhaawac joogto ah oo xagga maqalka ah. Ragga waxaa ku dhici kara caabuuq xanuun badan oo xiniinyaha ah, kaas oo keeni kara madhaleysnimo.

Tallaalku wuxuu mararka qaar keeni karaa calaamado khafiif ah iyo dhib aan gebi ahaanba khatar lahayn sida feebaro iyo finan soo baxaya hal ilaa laba toddobaad tallaalka ka dib. Marmar dhif ah wuxuu keenaa xanuun khafiif ah oo xagga kalagoosyada ah ama barar u eg sida kan qaamow-qashiirka. Ma qaadsiin kartid dadka kula jooga.

Laakiinse, feyruska tallaalku wuxuu jirka ku jiri karaa dhowrkoo bilood, tallaalka ka dib. **Micnaha, maaha inaad uur qaaddo labada bilood ee soo socda, tallaalka ka dib, maxaa yeelay wuxuu markaas uurkujirka u keeni karaa dhaawac.** Qaab habboon oo uurka looga hortago waa inaad kala sheekeysataa taqtarka/umulisada inta aadan isbitaalka ka bixin ka hor. Haddii, saas oo ay tahay, aad labadaas bilood uur yeelato, waa inaad sida ugu dhakhsaha badan ula xiriirtaa taqtar ama xarunta daryeelka hooyooyinka.

Wax waad nuujin kartaa sida caadiga ahba, tallaalka ka dib.

U sheeg umulisada qaybta BB-ga haddii aad rabto in lagu tallaalo. Sidoo kale markaas u sheeg haddii aad qabto cudur halis ah ama xasaasiyad daran.



Waxaan halkan ku xaqiijinayaa inaan ka qayb qaatay waxbarashada khuseysa tallaalka jadeecada, jadeeca jarmalka iyo qaamow-qashiirka.

Härmed bekräftar jag att jag tagit del av den undervisning som gäller vid vaccination mot röda hund, mässling och påssjuka

Magaca

Namn.....

Nambarrada aqoonsiga

Personnummer.....

Qeybta

Avdelning.....

Taariikhda

Saxiixa bukaanka

Namn

Patientens underskrift
